SİDEE LOO TUKADAA SALAADDA?

www.tevhiddersleri.org ◆ www.tevhiddergisi.org



Sidee loo tukada salaadda?

Sida loo tukado salaadda rag iyo dumarba waa isku mid. Ma jiro wax farqi u dhexeeya.

"Sida anniga sallaadda u tukanaya oo kale u tukada." (Bukhaari, 631; Muslim, 674)

"Dumarku waa sida ragga oo kale." (Abuu Daawuud, 236; Tirmidhi, 113)

Adigoo carabka ku odhanaya "Alle dartiis ayaan u niyeystay, niyad sidaas oo kale ah ma jirto..."

Taasina waa bidco aan diinta ku jirin balse gadaal ka timid, Niyada waa midda **qalbiga laga niyeysto.**

1. Takbiir ayaa lagu furaya salaadda.

Gacmaha ayaa kor loo taagaya, waxaana lala simaya garbaha ama ilaa dhegaha, iyadoo calaacasha gacmaha ay u jeedaan dhanka qiblada, markaas ka dibna waxaa la odhanaya "Allaahu Akbar!"

"Rasuulku (scw) inta uusan salaadda bilaabin, labada gacmadood ayuu kor u qaadi jiray ilaa heerka garbihiisa." (Bukhaari, 738)

"Rasuulku (scw) markuu tukanayo wuxuu kor u taagi jiray gacmihiisa, iyadoo calaacasha labadiisa gacmadood uu u jiheyn jiray dhanka qiblada, oo ilaa heerka dhagihiisa ayuu gaarsin jiray." (Muslim, 401)

2. Gacmaha ayaa la is dul saaraya

Gacmaha; gacanta midig ayaa gacanta bidix la dul dhigaya iyadoo laabta sare la dul dhigayo, waxaa loo samayn karaa laba siyaabood:

a. In gacanta midig la dul saaro curcurka (bijinta) gacanta bidix laga bilaabo curcurka gacanta bidix ilaa xusulka)

b. In gacanta midig lagu qobto gacanta bidix

• Waxaa Gacanta midig la dul saari karaa meel kasta laga bilaabo cududda gacanta bidix ilaa xusulka.

Waxaa laga soo weriyey Wail ibnu Xujr (rc):

"Waxaan naftayda ku idhi, 'Waxaan eegi doonaa siduu Nabigu u tukado.' Waxaana bilaabay inaan daawado siduu Nebiga u tukado. Nebigu (scw) ayaa u istaagay salaadda, oo qiblada ayuu u jeestay, Allahu Akbar ayuu yidhi, gacmihiisana kor ayuu u taagay ilaa u la'ag simay heerka dhegihiisa. Markaasuu gacantiisa midig dul saaray curcurka (bijimaha) gacantiisa bidix dusheeda." (Abuu Daawuud, 726; Nasaa'i, 889)



3. Ducaa'ul İftitaax ayaa la akhrinaya.

سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ وَبِحَمْدِكَ. وَتَبَارَكَ اسْمُكَ. وَتَعَالَى جَدُّكَ. وَلاَ إِلَهَ غَيْرُكَ

"Allow! waan kuu mahad naqayaa, waxaana kaa nasinnaya dhammaan cilidaha oo dhan, magacaagu waa barakeysan yahay, haybaddaaduna waa mid sare, llaah kale ma jiro adiga mooyee." (Abuu Daawuud, 775; Tirmidhi, 242)

• Waxaa jira ducooyin kala duwan oo Rasuulku (scw) ku furan jiray salaadda; mid ka mid ah ducooyinkaas waa la akhrin karaa.

4. Cacuzu İyo Bisinka ayaa la akhrinaya:

Alle ayaa la magan galaya:

اَعُوذُ بِاللهِ مِنَ الشَّيْطَانِ الرَّجِيمِ

"Alle waxaan ka magan galay shaydaanka la eryey."

Kadibna bisinka ayaa la akhrinaya:

"بِسْمِ اللهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِيمِ"

"Magaca Alle ayaan ku billaabaya ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista."

"Bisinka" si aamusnaan ah ayaa loo akhriyaa, oo ay ku jiraan salaadaha Subax, Maqribka iyo Cishaha oo imaamku si bareer ah u akhriyo Qur'aanka.

Waxaa Anas (rc) laga soo wariyey sidatan:

"Waxaan la tukaday Rasuulka, Abuu Bakar, Cumar iyo Cusmaan. Laakiin maan maqal mid iyaga ka mid ah oo bisinka kor u akhrinaya." (Muslim, 399)

5. Faatixa ayaa la akhrinaya:

Faatixa waa nuxurka salaadda. Waxaa xusid mudan in aan la aqbalin salaad aan Faatixa ku jirin. (Bisinka waa aayad ka mid ah suuradda Faatixa.)

"Faatixatul kitaab haddaadan akhrinin salaada lagaama aqbalayo." (Bukhaari, 756; Muslim, 394)



بِسْمِ اللهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِيمِ
اَلْحَمْدُ لِلّٰهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ ۙ * اَلرَّحْمٰنِ الرَّحِيمِ ۙ * مَالِكِ يَوْمِ الدِّينِ ۝ * إِيَّاكَ نَعْبُدُ وَإِيَّاكَ نَسْتَعِينُ ۝ * اِهْدِنَا الصِّرَاطَ الْمُسْتَقِيمَ ۝ * صِرَاطَ الَّذِينَ اَنْعَمْتَ عَلَيْهِمْ ۙ غَيْرِ الْمَغْضُوبِ عَلَيْهِمْ وَلَا الضَّالِّينَ

"Magaca Alle ayaan kubillaabaya ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista. Mahad Alle ayaa iska leh ee barbaariyaha Caalamka ah (Koonka). Ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista. Ee hanta maalinta abaalmarinta (Qiyaamada). adiga unbaan ku caabudaynaa, adiga unbaana kaa kaalmo waydiisanaynaa. Ee nagu hanuuni jidka toosan (Xaqa). Jidka kuwii aad unicmaysay eedan u cadhoonin dhuminna." (1/Fâtiha, 1-7)

Qofkii aan aqoonin suuradda Faatixa waxa uu akhrin karaa adkaartan soo socota ila a uu ka xafidaayo:

'Nin baa u yimid Rasuulka (scw) oo ku yidhi:- Qur'aanka waxba kama xafidi karo. I bar wax kale oo ku filan oo beddela! ayuu yidhi Rasuulku (scw) wuxuu yiri:- waxaad dhahdaa:

سُبْحَانَ اللهِ وَالْحَمْدُ لِلّٰهِ وَلاَ اِلَهَ اِلاَّ اللهُ وَاللهُ اَكْبَرُ وَلَا حَوْلَ وَلَا قُوَّةَ اِلاَّ بِاللهِ الْعَلِيِّ الْعَظِيمِ

'Alle ayaa ka sarreeya dhammaan sifooyinka aan qummanayn. Alle ayaa mahad iska leh. Alle mooyee ilaah kale ma jiro. Alle baa weyn, awood iyo xoogna ma jiro Alle mooyee, kor ahaaye oo heybedle ah.' " (Abuu Daawuud, 832; Nasaa'i, 924)

6. Qur'aan ayaa la akhrinaya

فَاقْرَؤُا مَا تَيَسَّرَ مِنَ الْقُرْاٰنِ

"(Hadday sidaas tahay) Akhriya wixii idiin Fududaada oo quraan ah..." (73/Muzzammil, 20)

Iyadoo la raacayo amarkan, waxaa quraanka laga akhrinaya suurad, qeyb quraanka ah, mise aayad. Rasuulku (scw) marna wuxuu akhrin jiray mid dheer, marna dhaxdhaxaad, marna suurad gaaban..



7. Waa La Rukuucaya

Sida qodobkii koo'waad oo kale, gacmaha ayaa kor loo taagaya, waxaa lala simaya ilaa heerka garbaha mise dhagaha, "Allaahu Akbar!" ayaa la odhanaya, markaas ka dibna, waa la Rukuucaya.

"Markuu Nabigu u istaago salaad, wuxuu kor u qaadi jiray gacmihiisa ilaa ay ka gaarayaan heerka garbihiisa, intaa ka dib; Allahu Akbar ayuu odhan jiray, Markuu damco inuu Rukuuco si la mid ah ayuu gacmaha kor u taagayey, markaas ka dibna uu odhanayay:- Sami Allaahu limen xamideh, Rabbenâ lak'l hamd." (Bukhaari, 738)

Marka la Rukuuco, gacmuhu waa in jilibka dushiisa la dul saara:

"Markuu Rasuulku (scw) uu Rukuuco, wuxuu calaacasha dul saari jiray jilbaha, farahiisana wax yar ayuu kala fidin jiray." (Bukhaari, 828; Ibnu Macee, 872)

"...Markuu rukuuco waxuu suxullada ka fogeyn jiray dhinacyadiisa." (Bukhaari, 790; Muslim, 535)

"Markuu Rasuulku (scw) Rukuuco, madaxa kor uma uu qaadi jirin aadna uma foorin jirin." (Ibnu Macee, 869)

Dhabarkiisu wuu toosin jiray; Madaxiisana kor uma uu qaadeynin, wax badanna ma uu foori jirin, laakiin taa beddelkeeda dhabarkiisa wuu simayey. (Qodobbada ku saabsan arrintan, waxa la soo wariyey in Rasuulku (scw) dhabarkiisa uu toosin jiray, xittaa haddii baaquli biyo lagu shubo oo dhabarkiisa la dul saaro aanay daadan.) (eeg Bukhaari, 828; Muslim, 498; Ibnu Macee, 872)

• Markaas ka dib, wuxuu akhrin jiray ducooyin, waxaa ka mid ah ducooyinkaas:

سُبْحَانَ رَبِّيَ الْعَظِيمِ

(Saddex jeer) "Waxaan Rabbigeyga weyn ka nasinaya dhamaan cilladaha oo dhan." (Muslim, 772)

سُبْحَانَ رَبِّيَ الْعَظِيمِ وَبِحَمْدِهِ

(Saddex jeer) "Waxaa mahad leh Rabbigeyga wayn, oo sareeya ah." (Abuu Daawuud, 870)

سُبُّوحٌ قُدُّوسٌ رَبُّ الْمَلاَئِكَةِ وَالرُّوحِ

"(Asiga) waa mid aad loo xuso, lagana nasiyyo dhamman cilladaha oo dhan, waana Rabbiga Malaa'igta iyo Ruuxa." (Muslim, 487)



8. Rukuucda ayaa laga soo kacaya

Marka Rukuucda laga soo kacayo, gacmaha ayaa kor loo taagaya ilaa heerka garbaha mise heerka dhegaha ayaa lala simaya, oo waxaa la odhanaya:

سَمِعَ اللهُ لِمَنْ حَمِدَه

"Alle waa maqlay cidda u mahad naqday." (Bukhaari, 735; Muslim, 390)

Isla markaa ka dib, mid ka mid ah ducooyinkan soo socda ayaa la akhrinaya;

رَبَّنَا لَكَ الْحَمْدُ

"Rabbigeenow, adiga ayaa mahad kuu sugnaatay." (Bukhaari, 722; Muslim, 409)

اَللَّهُمَّ رَبَّنَا وَلَكَ الْحَمْدُ

"Rabbigeena ah Alle, adiga ayaa mahad kuu sugnaatay." (Bukhaari, 795)

رَبَّنَا وَلَكَ الْحَمْدُ حَمْدًا كَثِيرًا طَيِّبًا مُبَارَكًا فِيهِ

"Rabbigeenow, mahad naq badan, nadiif ah, oo barakeysan ayaan kuugu mahad naqeyna."

"Nin ku tukanayay Rasuulka (scw) gadaashiisa ayuu Alle ku xusay erayadan. Markuu Rasuulka (scw) uu dhameeyey salaadda, waayo cidda ducadan akhrisay? ayuu yidhi.

Markii uu ninku yidhi waa anniga, Rasuulku (scw) ayaa yidhi:- 'Waxaan arkay soddon malaa'igood oo ku tartamaya si ay u qoraan abaal-marintan." (Bukhaari, 799)

9. Waa La Sujuudaya

"Rasuulku (scw) ka hor inta uusan sujuudin, Takbiir ayuu odhan jiray, jilbaha ayuu dhuulka ku hor marin jiray, ka dibna calaacasha ayuu dhuulka dul saari jiray." (Abuu Daawuud, 838; Tirmidhi, 268)

• Sanka, foodda, gacmaha, cidhibta cagaha, suulasha cagaha iyo jilbaha waa in la dul saara dhulka.

Rasuulka (scw) wuxuu yidhi: "Waxaa la igu amray inaan ku sujuudo todobadayda xubnood: wejiga (asiga oo tilmaamaya sankiisa), labada gacmood, jilbaha, cidhibta cagaha iyo suulasha cagaha." (Bukhaari, 809; Muslim, 490)



• Marka la sujuudo, gacmaha waa in lala simo heerka garbaha ama ka ballaaran. Suxullada waa ln la kala fogeeya oo kor loo qaada, sidoo kale, waa in la xidhin oo dhulka la taabsinin.

Waxaa laga soo wariyey Cabdullaahi ibn Maalik (rc):

"Markuu Rasuulku (scw) uu sujuudo, waxuu kala taagi oo kala fogeyn jiray gacmihiisa, xittaa waxan arkayay cadaanka kilkillihiisa." (Muslim, 495)

"...Xittaa hadduu wan damco inuu dhaxmaro garbihiisa dhaxdooda wuu dhax mari karay." (Muslim, 496)

"Rasuulka (scw) markuu sujoodo, waxaan ka xanuun sannayney silaca uu dareemayo, markuu gacmihiisu ka fogeeyo dhinacyadiisa." (Abuu Daawuud, 900; Ibnu Macee, 887)

"Midkiinna yuusan gacmihiisa dhulka ku fidinin sida eeyga oo kale." (Bukhaari, 822; Muslim, 493)

"Rasuulka (scw) wuxuu yidhi: 'Gacmahaaga haku kala bixin dhuulka sida dhurwaa oo kale, calaacasha ku tiirso, gacmahaaga ka fogee - dhinacyadaada. Markaad sidaas samayso, qayb kasta oo jidhkaaga ka mid ah ayaa kula sujuudaya." (Sahihu ibn Xuzeyme, 645; Al-Mustedrek, 827)

• Cidhibaha waa in la isku dhejiya.

"Nabigu (scw) wuxuu dhuulka dul saari jiray suulasha cagaha iyo jilbaha, suulasha cagahana xagga qiblada ayuu aadin jiray (Bukhaari, 828), waxuu isku dhejin jiray labadiisa cidhib (Muslim, 486; Es-Sunenu'l Kubra, 2719) Labadiisa cidhib kor ayuu aadin jiray. Wuxuu ku amri jiray saxaabada inay sidaas oo kale sameeyaan." (Tirmidhi, 277)

Waxaa laga soo wariyey Bara ibn Casiib (rc):

"Rasuulku (scw) gacmihiisii ayuu dhulka dul saaray, sinta ayuu kor u taagay oo toosiyay, sidaas ayuu Nabigu (scw) u sujuudi jiray." (Abuu Daawuud, 896)

"Sidoo kale, Nabiga (scw) wuxuu calooshiisa ka fogeyn jiray dhuulka, oo xusuladana ka fogayn jiray dhuulka." (Nasaa'i, 1105)



Marka la sujuudo, waxa la akhrinaya mid ka mid ah ducooyinka sunnaha ku sugan ee sidatan:

سُبْحَانَ رَبِّيَ الْأَعْلَى

(3 jeer) "Rabbigeena ah kan ugu sarreeya, waxaan kaa dheereynaya dhammaan cilladaha oo dhan" (Muslim, 772)

سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ وَبِحَمْدِكَ اللَّهُمَّ اغْفِرْلِي

"Rabbiggena ah Alle! Annigoo u mahad naqaya, waxaan kaa dheereynaya dhammaan cilladaha oo dhan. Allow! Anniga ii dambi dhaaf." (Bukhaari, 817, Muslim, 484)

سُبُّوحٌ قُدُّوسٌ رَبُّ الْمَلَائِكَةِ وَالرُّوحِ

"(Asiga) waa mid aad loo xuso, lagana nasiyyo dhamman cilladaha oo dhan, waana Rabbiga Malaa'igta iyo Ruuxa." (Muslim, 487)

اَللَّهُمَّ اِنِّى اَعُوذُ بِرِضَاكَ مِنْ سَخَطِكَ، وَبِمُعَافَاتِكَ مِنْ عُقُوبَتِكَ وَاَعُوذُ بِكَ مِنْكَ لاَ اُحْصِى ثَنَاءً عَلَيْكَ اَنْتَ كَمَا اَثْنَيْتَ عَلَى نَفْسِكَ

"Allow, waxaan kaa magan galay Cadhadaada raali-ahaanshahaada, ciqaabtaadana dembi-dhaafkaaga; Adigana, adiga ayaa kaa magan galay, Ma tirin karo ammaantaada. Adiga, sidaad isku amaantay ayaad tahay." (Muslim, 486)

اَللَّهُمَّ لَكَ سَجَدْتُ وَبِكَ اٰمَنْتُ، وَلَكَ اَسْلَمْتُ، سَجَدَ وَجْهِىَ لِلَّذِى خَلَقَهُ، وَصَوَّرَهُ، وَشَقَّ سَمْعَهُ، وَبَصَرَهُ، تَبَارَكَ اللّٰهُ اَحْسَنُ الْخَالِقِينَ

"Allow adiga uun baan kuu sujuuday, adigaan ku rumeeyey iyo waan isdhiibay, wejigayga; wuxuu u sujuuday (Allaha) abuuray oo isha iyo dhegta u yeelay. Allena waa kan ugu khayr badan ee ugu sareeya kuwa qadariya oo qaabeeya." (Muslim, 771; Nasaa'i, 1126)



10. Marka sujuuda laga soo tooso, cabbaar ayaa la fadhiisanaya

"Rasuulku (scw) waxuu sujuuda ka soo toosi jiray asigoo takbiirsanaya." (Bukhaari, 795; Muslim, 392)

"Qofna ma dhammaysto salaaddiisa ilaa ay sujuudaan xubnaha jidhkiisa oo toosan, ka dibna madaxiisa kasoo qaado sujuudda isagoo leh 'Allaahu Akbar' oo ka dibna si fiican u fariistay." (Abuu Daawuud, 858)

Rasuulkeena (scw) **sida uu u fadhiisan jiray:**

a. Rasuulku (scw) waxuu dhigi jiray cagtiisa bidix dhulka asagoo ku dul fadhiisan jiray, isaga oo ku beeraya cagtiisa midig (Bukhaari, 827), Asigoo kor aadin jiray caarada cagtiisa xagga qiblada. (Bukhaari, 828)

b. "Rasuulku (scw) wuxuu mararka qaar kor aadin jiray labadiisa cidhib,wuxuuna ku fadhiisan jiray caarada suulasha." (Muslim, 536)

• Gacanta midig waxaa la saarayaa kubka midig, ta bidixna waxaa la saarayaa kubka bidix, calaacalaha ayaa ladul saaraya dusha kubka.

Markuu sujuuda kasoo kaco, Ducooyinkii uu akhrin jiray Nabigeena (scw)**:**

رَبِّ اغْفِرْ لِى رَبِّ اغْفِرْ لِى

"Rabbiyow, i cafi, Rabbiyow, i cafi." (Abuu Daawuud, 874; Ibnu Macee, 897)

اَللَّهُمَّ اغْفِرْ لِى، وَارْحَمْنِى، وَاهْدِنِى، وَاجْبُرْنِى، وَعَافِنِى، وَارْزُقْنِى، وَارْفَعْنِى

"Allahyow ii dambi dhaaf oo ii naxariiso, jidka toosan igu hanuuni oo wanaag i sii, caafimaad iyo arsaaq i sii, oo kor ii qaad." (Abuu Daawuud, 850; Tirmidhi, 284)

11. Sujuudda labaad ayaa la'aadaya

Mar labaad ayaa la Takbiirsanaya, sujuudda labaad ayaa la aa'daya. (eeg Bukhaari, 790; Muslim, 535)

Sujuudda labaad ka dib, sidii sujuudii hore, ayaa loo takbiirsanaya, markaas ka dib, waxaa loo istaagayaa rakcada labaad.

12. Fadhiga Nasashada

Rasuulku (scw) waxuu fadhiisan jiray cabbaar ka hor inta aanu u kicin rakcada labaad:

Sida laga wariyey Maalik bin Xuweyris (rc):

"Rasuulku (scw) markuu sujuudda labaad ka soo tooso, cabbaar



ayuu fadhiyi jiray, wuxuuna istaagi jiray markuu dhulka cabbaar fadhiyo." (Bukhaari, 824)

• Rakcada labaad, marka la akhriyo Suuratul Faatixa, lana akhriyo qeyb ka mid ah Qur'aanka, rukunka rukuucda iyo sujuudana la'oofiyo, ayaa loo fadhiisanaya tashahhud.

13. Tashahhudka koo'waad

Rakcada labaad marka la dhameeyo, qofka wuxuu u fadhiisanayaa sidii labada sujuud dhexdooda oo kale (eeg Bukhaari, 828). Farta murdisa ee gacanta midig ayaa kor loo taagaya iyadoo la aa'dinayo xagga qiblada. Faraha kale ee gacanta midigna waa la isku dhejinaya si waafaqsan sunnada (fiiri Muslim, 579-580; Abuu Daawuud, 957). Ducaa'ul tashahhud ayaa la akhriyaa:

"Rasuulku (scw) wuxuu gacantiisa bidix ku fidin jiray jilibka bidix, wuxuuna isku dhejin jiray faraha gacantiisa midig, marka laga reebo farta murdisa oo kor u taagi jiray, iyada ayuu eegi jiray, asigoo u jaheynaya xagga qiblada." (Muslim, 580; Abuu Daawuud, 990)

• Waxa sunna ah waa in la eego farta murtida ee gacanta midig marka la fadhiyo tashahhudka.

• Salaaddaha labada rakcadood ah, waxa ku jira hal tashahhud oo kaliya, tashahhudkanna waxa loo sameeynaya sida tashahhudka ugu dambeeya oo kale.

Ducooyinka la akhriyo Tashahhudka koo'waad

اَلتَّحِيَّاتُ لِلّٰهِ، وَالصَّلَوَاتُ وَالطَّيِّبَاتُ، اَلسَّلاَمُ عَلَى النَّبِيِّ وَرَحْمَةُ اللهِ وَبَرَكَاتُهُ، اَلسَّلاَمُ عَلَيْنَا وَعَلَى عِبَادِ اللهِ الصَّالِحِينَ. اَشْهَدُ اَنْ لاَ اِلَهَ اِلاَّ اللهُ وَاَشْهَدُ اَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ

"Salaan, duco iyo wanaag oo dhan Alle kaliya ayaa iska leh, nabad gelyo iyo naxariisina Nabigeena (scw) korkiisa ha ahaato, annaga iyo addoommada Alle ee saalixiinta ah nabad gelyo korkeena ha ahaato, waxaan ka maraq kacayaa in Alle mooye illaah kale (oo cibaadada xaq u leh) aanu jirin, waxaan kaloo ka marag kacayaa in Muxammad yahay addoonkiisii iyo rasuulkiisii." (Bukhaari, 835; Muslim, 402)

14. Tashahhudka ugu dambeeyo

Rakcada ugu dambeyso ee salaada waxa loo fadhiistaa tashahhud si la mid ah sidii tashahhudkii hore. Intaa waxa sii dheer, taxahuudka ugu dambeeya fadhi la yidhaahdo tawarruuq ayaa la fadhiisanaya, waa sida soo socota:

"Rasuulku (scw) markuu tashahhudka ugu dambeeyo fadhiyo, sinta ayuu dhulka ku dayn jiray, cagtiisana dhinac ayuu ka soo bixin jiray." (Bukhaari, 828)

• Fadhiga tawarruq waxa la sameeyaa oo kaliya tashahhudka ugu dambeeya.

• Qaabka gacmaha laga yeelayo Tashahhudka ugu dambeeyo,waa si la'mid ah sidii tashahhudka koo'waad.

Tashahhudka ugu danbeya, ducooyinka sunnaha ku soo aroortay ayaa lagu duceysanaya, tusaale ahaan:

اَلتَّحِيَّاتُ لِلّٰهِ، وَالصَّلَوَاتُ وَالطَّيِّبَاتُ، اَلسَّلاَمُ عَلَى النَّبِيِّ وَرَحْمَةُ اللهِ وَبَرَكَاتُهُ، اَلسَّلاَمُ عَلَيْنَا وَعَلَى عِبَادِ اللهِ الصَّالِحِينَ. اَشْهَدُ اَنْ لاَ اِلَهَ اِلاَّ اللّٰهُ وَاَشْهَدُ اَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ

"Salaan, duco iyo wanaag oo dhan Alle kaliya ayaa iska leh, nabad gelyo iyo naxariisina Nabigeena (scw) korkiisa ha ahaato, annaga iyo addoommada Alle ee saalixiinta ah nabad gelyo korkeena ha ahaato, waxaan ka maraq kacayaa in Alle mooye illaah kale (oo cibaadad xaq u leh) aanu jirin, waxaan kaloo ka marag kacayaa in Muxammad yahay addoonkiisii iyo rasuulkiisii." (Bukhaari, 835; Muslim, 402)

اَللّٰهُمَّ صَلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى اٰلِ مُحَمَّدٍ كَمَا صَلَّيْتَ عَلَى اِبْرَاهِيمَ وَعَلَى اٰلِ اِبْرَاهِيمَ، اِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ، اَللّٰهُمَّ بَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى اٰلِ مُحَمَّدٍ كَمَا بَارَكْتَ عَلَى اِبْرَاهِيمَ وَعَلَى اٰلِ اِبْرَاهِيمَ، اِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ

"Allow xus Muxammad iyo ehelkiisa, sidaad u xustay Ibraahim iyo ehelkiisaba, waxaa hubaal ah inaad tahay mid aad loogu mahad noqo, weyn, oo sharaf iska leh, Alloow barakey Muxammad iyo ehelkiisa, sidaad u barakeysey Ibraahim iyo ehelkiisaba,waxaa hubaal ah inaad tahay mid aad loogu mahad noqo, weyn, oo sharaf iska leh." (Bukhaari, 3370; Muslim, 406)

اَللّٰهُمَّ اِنِّى اَعُوذُ بِكَ مِنْ عَذَابِ الْقَبْرِ، ومِنْ عَذَابِ جَهَنَّمَ، ومِنْ فِتْنَةِ الْمَحْيَا والْمَمَاتِ، ومِنْ فِتْنَةِ الْمَسِيحِ الدَّجَّالِ

"Allow! waxaan kaa magan galayaa cadaabka qabriga, cadaabka naarta, fidnada nolosha iyo geeridaba, iyo fitnada sharta Masiixul Dajjaal." (Bukhaari, 1377; Muslim, 588)

اَللّٰهُمَّ اِنِّى ظَلَمْتُ نَفْسِى ظُلْمًا كَثِيرًا، وَلاَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ اِلاَّ اَنْتَ، فَاغْفِرْ لِى مَغْفِرَةً مِنْ عِنْدِكَ وَارْحَمْنِى اِنَّكَ اَنْتَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ

"Allow, naftayda wax badan baan dulmiyey, adiga keliya ayaa ii dembi dhaafi kara, dambi dhaaf dhankaada ka ah igu dambi dhaaf, iina naxariiso, waxaa hubaal ah inaad tahay Al-Gafuur iyo Ar-Raxiim." (Bukhaari, 834; Muslim, 2705)

اَللَّهُمَّ اِغْفِرْ لِي مَا قَدَّمْتُ، وَمَا اَخَّرْتُ، وَمَا اَسْرَرْتُ، وَمَا اَعْلَنْتُ، وَمَا اَسْرَفْتُ، وَمَا اَنْتَ اَعْلَمُ بِهِ مِنِّي، اَنْتَ الْمُقَدِّمُ، وَاَنْتَ الْمُؤَخِّرُ لاَ اِلَهَ اِلاَّ اَنْتَ

"Allow! İga cafi dembiyada aan sameeyey iyo kuwa aan samayn doono, oo si qarsoodi ah iyo si cad ah u sameeyey, wixii aan khasaariyey, dambiyadaasi waad iga aqoon badan tahay ee iga cafi. Waxaad tahay mid hore u qaada (muqaddim) iyo mid dib-u-dhiga (muakhkhir). Adiga mooyee ilaah kale (oo cibaadada xaq u leh) ma jiro." (Muslim, 771)

اَللَّهُمَّ اَعِنِّي عَلَى ذِكْرِكَ، وَشُكْرِكَ، وَحُسْنِ عِبَادَتِكَ

"Allow iigu gargaar inaan ku xuso, kuu mahadiyo, iyo inaan si wanaagsan kuu caabudo." (Abuu Daawuud, 1522; Nasaa'i, 1303)

15. Waa la salaam naqsanaya

Rasuulku (scw) wuxuu u jeesan jiray dhanka midig ilaa dhabankiisa uu u muuqdo, wuxuuna oran jiray:

اَلسَّلَامُ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَةُ اللهِ

Kadibna dhankiisa bidix ayuu u jeesan jiray ilaa dhabankiisa uu mar kale u muuqdo, wuxuu ku celin jiray:

اَلسَّلَامُ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَةُ اللهِ (Abuu Daawuud, 996; Tirmidhi, 295)

• Xittaa haddii aanu qofku garaneyn ducooyinka la khriyo salaadda, waa in waqti gudaheeda ku bilaabo si uu ducooyinkaas u barto oo isku dayo. Sababtoo ah ma jirto cudur daar ah in laga tago salaadda:

"Qofka iyo gaalnimadu waxa u dhexeeya waa salaadda oo laga tago." (Muslim, 82; Abuu Daawuud, 4678)

Waxaa laga soo wariyey Cabdullaahi ibnu Shaakik (rc):

"Saxaabada nebiga (scw) marka laga reebo salaadda, camalada kale uma ay qaadanayn gaalnimo." (Tirmidhi, 2622)

Waxaa sidan laga soo wariyey Abuu Dardaa (rc):

"Qofka aan salaadda tukaneyn iimaan ma leh." (Ta'zîmu Kadri's Sala, Marwezi, 946)

Waxaad iskaan kartaa lambarka QR si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan xeerarka, muhiimada iyo axkaamta salaadda.